JAMHUURIYADDA		SOMALILAND

FAAFINTA RASMIGA AH

SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	ألنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA, MADAXTOOYADDA JSL, HARGEYSA,
E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com

Sanadka: 1aad	Cadadka: 6aad ee June	Taariikh: 07/07/2012

QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.

RUKUNKA (Subscription):

QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.

TUSMADA CADADKA

	Bogga
QAYBTA KOWAAD: **XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:** ***Sooma bixin***	295
QAYBTA LABAAD: **XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:**	296
1) **Magacaabid,** **XEER MADAXWEYNE Lr: 0242/062012**	297
2) **Magacaabid,** **XEER MADAXWEYNE Lr: 0243/062012**	298

3) **Magacaabid,** **XEER MADAXWEYNE Lr: 0244/062012**	299
4) **Magacaabid,** **XEER MADAXWEYNE Lr: 0245/062012**	300 301
5) **Beddel,** **XEER MADAXWEYNE Lr: 0246/062012**	302
6) **Magacaabid,** **XEER MADAXWEYNE Lr: 0247/062012**	
7) **Xil-ka Qaadis,** June 18, 2012	303
8) **Magacaabid,** **XEER MADAXWEYNE Lr: 0248/062012**	
QAYBTA SADEXAAD: **DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA**	

WASIIRADA, IWM • **Wareegtada Xaddidaada Dhaqdhaqaaqa Gaadiidka Dawlada Saacadaha shaqada ka dib** **QAYBTA AFRAAD: AMARADA & GO'AANADA MAAMUL** ***Sooma bixin*** ***QAYBTA SHANAAD*: OGEYSIISYADA** ***Sooma bixin***	

QAYBTA LABAAD:

XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:

JSL/M/XERM/249-1154/062012 18/06/12

XEER MADAXWEYNE Lr:

0242/062012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:	Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
Markuu Tixgeliyey:	Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
Markuu Arkay:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta ee JSL;
Markuu La Tashaday:	Madaxda ay khusayso;
Markuu Ku Qancay:	In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdirashiid Cabdilaahi Maxamed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland
JSL/M/XERM/249-1155/062012 18/06/12

XEER MADAXWEYNE Lr:

0243/062012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:	Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
Markuu Tixgeliyey:	Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
Markuu Arkay:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee JSL;
Markuu La Tashaday:	Madaxda ay khusayso;
Markuu Ku Qancay:	In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Axmed Cumar Faahiye, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland
JSL/M/XERM/249-1156/062012 18/06/12

XEER MADAXWEYNE Lr:

0244/062012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:	Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
Markuu Tixgeliyey:	Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
Markuu Arkay:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigelinta ee JSL;
Markuu La Tashaday:	Madaxda ay khusayso;
Markuu Ku Qancay:	In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdirashiid Jibriil Yoonis, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigelinta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland
JSL/M/XERM/249-1157/062012 18/06/12

XEER MADAXWEYNE Lr:

0245/062012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:	Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
Markuu Tixgeliyey:	Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
Markuu Arkay:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda ee JSL;
Markuu La Tashaday:	Madaxda ay khusayso;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Saleebaan Jaamac Diiriye, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland
JSL/M/XERM/249-1158/062012 18/06/12

XEER MADAXWEYNE Lr:

0246/062012

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee

	Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee JSL;
Markuu La Tashaday:	Madaxda ay khusayso;
Markuu Ku Qancay:	In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Faysal Cali Sheekh, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland
JSL/M/XERM/249-1159/062012 18/06/12

XEER MADAXWEYNE Lr:

0247/062012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:	Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay:	Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
Markuu Tixgeliyay:	Ahmiyadda ay Gudoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
Markuu Aqoonsaday:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka Sanaag;
Markuu La Tashaday:	Madaxda ay arrintani khusayso;
Markuu ku Qancay:	In uu buuxin karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Ismaaciil Cabdi Xasan Maxamed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka Sanaag ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XILQ/249/1-1161/062012 18/06/12

Ku: Mudane, Axmed Xasan Nuur
Maareeyihii Hore ee Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka ee WFP **-Hargeysa-**

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Maareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka ee WFP (Food Coordination Agency).

Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Maxamed Daahir Axmed, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1160/062012 18/06/12

XEER MADAXWEYNE Lr:

0248/062012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:	Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
Markuu Tixgeliyey:	Ahmiyadda ay Hay'adda Xidhiidhinta Raashinku u leedahay Dhismaha Qaranka;
Markuu Arkay:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Maareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka ee WFP (Food Coordination Agency) ee JSL;
Markuu La Tashaday:	Madaxda ay khusayso;
Markuu Ku Qancay:	In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Maxamed Daahir Axmed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka ee WFP ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA SOMALILNAD

WASAARADDA HAWLAHA GUUD,GURIYAYNTA IYO GAADIIDKA

Ref WHG/G/XW/346/012 12/6/2012

KU:Dhamman Wasaaradaha Dawladda Hargaysa
Ku:Dhamman Hay'adaha Dawladda Hargaysa
Og: Ciidanka Nabadgelyada Waddooyinka Hargaysa

UJ: Wareegtada Xaddidaada Dhaqdhaqaaqa
Gaadiidka Dawlada Saacadaha shaqada ka dib

Ka dib :

- Markaan arkay sharciga xeerka maamulka gaadiidka dawladda qodobkiisa 10 aad,
- Markaan arkay warbixinta qiimaynta dhaqaalaha kharashka shidaalka iyo daryeelka gaadiidka dawladda.
- Markaan arkay baylahda, dayaca iyo masuuliyad darada gaadiidka dawladda wakhtigan
- Markaan arkay baahida loo qabo in la dhaqan geliyo sharcigan.

Waxa wasaarada Hawlaha guud iyo guriyaynta iyo gaadiidka JSL soo saartay wareegtadan oo lagu mamnuucaayo laguna xaddidaayo saacadaha dhaqdhaqaaqa gaadiidka dawladda marka laga reebo kuwa fasaxa dhaqdhaqaaqa ka haysta wasaaradda Hawlaha Guud Guriyaynta iyo gaadiidka, si loo ilaaliyo oo loo dhaqaaleeyo hantida gaadiidka dawladda oo kharash dhaqaale oo badan innaga qaba sannad walba .

Sidaas daraadeed waxa lagu war gelinayaa dhammaan wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee wareegtadani khusayso in ay tix geliyaan una hogaansamaan sharcigan marka qoraalku soo gaadho isla mar ahaantaana laga baahiyo war baahinta .

Sidoo kale waxa wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyaynta iyo gaadiidku ka codsanaysaa ciidanka Nabadgelyada Wadooyinka JSL, in ay ka hawlgalaan oo ku ilaaliyaaan kuna daba galaan dhaqan gelinta sharciga dhamaan gaadiidka dawladda.

ALLAA MAHAD LEH

WASIIRKA WASAARADDA HAWLAHA GUUD
IYO GURIYAYNTA IYO GAADIIDKA
Axmed Cabdi Maxamuud (Xaabsade)